Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS)
Tilmaamaha Dib u cusbooneysiinta Medicaid oo loogu talagalay Qoysaska leh Carruurta Qabta Naafanimada Maskaxda iyo Korriinka (I/DD)

Adeegyada badankooda ee ilmuhu helo ee la adeegsanayo nidaamka adeeg ee naafanimada maskaxda iyo korriinka (I/DD) wuxuu farayaa in ilmahaasi la ogaado in uu u qalmo adeegyada I/DD iyo Medicaid labadoodaba. U qalmida Medicaid waa in dib loo cusbooneysiisa sanad kasta. Nidaamkaasi waxaa loo yaqaanaa nidaamka dib u cusbooneysiinta, ama “dib u go’aaminta.” Laga bilaabo 2021, Oregon waxay bilaabi doontaa isticmaalka nidaamka the OregONEligibility (ONE) oo loogu talagalay dhammaan u qalmida iyo dib u cusbooneysiinta Medicaid. Tilmaamahani waxay sharraxayaan nidaamka dib u cusbooneysiinta iyo sida uu ula shaqeyn doona nidaamka cusub ee OregONEligibility (ONE).

Maxay tani muhiim u tahay?

Haddii adiga ama xubin ka tirsan qoyskaaga laga codsaday in uu dib u cusbooneysiiyo ama dib loogu go’aamiyo u qalmidaada Medicaid, taasi waxay ka dhigan tahay in ilmahaaga uu hadda helayo adeegyada Medicaid oo la joogo wakhtigii la xaqiijin lahaa in uu weli u qalmo. Haddii aadan dhammeystirin nidaamka dib u cusbooneysiinta, waxaa dhici karta in ilmahaagu uusan kaliya lumin u qalmida Medicaid, ee ay dhici karto in uu sidoo kale lumiyo helitaanka adeegyada lagu helayo nidaamka I/DD. Waa muhiim in aad soo soo jawaabto haddii lagugula soo xiriiray email ama telefoon ahaan taasi oo ku saabsan dib u cusbooneysiinta u qalmida Medicaid ee loogu talagalay ilmahaaga.

Waa maxay faa’iidada uu leeyahay nidaamka cusub ee dib cusbooneysiinta Medicaid ee OregONEligibility (ONE)?

Marka aad gudbiso xirmadaada dib u cusbooneysiinta Medicaid, waxaa la gelin doonaa diiwaanka xogta oo la iskula wadaago macluumaadka ku saabsan dhammaan adeegyada uu ilmahaagu u qalmo in uu helo. Marka adeegyadaada hal meel oo dhex la iskugu keeno, waa in ay waxyaabaha,

sida nidaamka dib u cusbooneysiinta ka dhigtaa, mid u sahlan qof kasta si loo qorsheyn karo.

Sidee baa la iila soo xiriiri doonaa marka dib u cusbooneysiin la iskaga baahan yahay?
Marka dib u cusbooneysiinta u qalmida Medicaid la iskaga baahan yahay, waxaad ku heli doontaa boos ahaan qiyaastii 60 maalmood ka hor inta aan la gaarin waqtigii dib u cusbooneysiinta. Fadlan wakhtigaasi dhammeystir xirmada dib u cusbooneysiinta. Haddii aad sameyn weydo, waxaad boosta ku heli doontaa warqad labaad oo loo yaqaan ogeysiinta xiritaanka oo kula socodsiinaysa in faa'iidooyinkii ilmahaagu ay joogsanayaan dhammaadka bishaasi. Haddii aad hesho ogeysiinta xiritaanka, waxaad weli haysataa fursad aad ku buuxiso codsiga dib u cusbooneysiinta oo dib ugu soo ceshato faa'iidooyinka Medicaid marka la gaaro dhammaadka bishaasi. Haddii aadan ka soo jawaabin labada warqadood midkoodna, Medicaid aad leeyahay waxay sii ahaan doontaa mid xiran waxayna noqonaysaa in aad dib u dalbato. Xusuusnow in caymiskaaga Medicaid uu ku xiran yahay adeegyadaada I/DD. Markaa, haddii aad lumiso Medicaid aad leedahay, waxaa dhici karta in aad sidoo kale lumiso adeegyadaada I/DD. Fadlan ha oggolaanin in uu dhaco wakhtiga dib u cusbooneysiintaada Medicaid!

Ayaa iga caawin kari buuxinta codsigayga dib cusbooneysiinta Medicaid?
Barnaamijkaaga I/DD ee degaanka, oo loo yaqaano Barnaamijka Naafanimada Korrinka ee Bulshada (CDDP), ayaa kaa caawin doona marka aad dib u cusbooneysiinayso Medicaid. Iyada oo ku xiran barnaamijka degaanka, waxaa dhici karta in ay kuu gudbiyaan hawl-wadaagaha bulshada ama xafiiska degaanka ee Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS) oo loogu talagalay caawimaada dhanka xirmada dib u cusbooneysiinta. Meelaha qaarkood, shaqaalaha CDDP ayay dhici kartaa in ay awoodaan in ay si toos ah kuu caawiyaan.

Haddii aad dhibaatooyin ku qabto xirmada dib u cusbooneysiinta ONE, fadlan *Xarunta Adeega Macmiilka ee ONE ka wac 1-800-699-9075 laga bilaabo 7 subaxnimo ilaa 6 galabnimo., Isniinta ilaa Jicmaha. **Fadlan waxaad ogsoonaataa taasi iyada oo sababtu tahay barnaamijka ONE oo cusub, waqtiyada khadka lagu jiro waxaa dhici karta in ay dheeraadaan. Si taxaddar leh u raacista tilmaamaha dhanka afka ah waxay kaa caawin doonaan helida qofka saxda ah oo aad wakhti kooban ku helayso. Fiiri Talooyinka loogu talagalay Waalidiinta, Qaybta A1.*

Miyay tani saameyn doontaa qoys kasta?
Sanadaha soo socda, dhammaan carruurta isqortay Medicaid si ay helaan adeegyada I/DD waxay bilaabi doonaan isticmaalka nidaamka cusub ee ONE marka la joogo waqtigoodii dib u cusbooneysiinta. Wakhtiga u horreeya ee aad u qalmidaada Medicaid dib uga cusbooneysiiso nidaamka ONE dhexdiisa, waxay qaadan doontaa waxoogaa dadaal ah oo ka badan dib u cusbooneysiinta kale waxayna aad ugu ekaan kartaa wakhtigii u horreysay ee aad dalbatay Medicaid. Waxay sababtaasi u tahay ilmahaagu oo la geliyay "set up" diiwaanka xogta oo cusub. Haddii aad jeclaan lahayd waxoogaa yar oo macluumaad ah oo dheeraad ah oo ku saabsan taasi, fadlan fiiri *Talooyinka loogu talagalay Waalidiinta, Qaybta A3,* ee ku jira **Tilmaamaha Dib u cusbooneysiinta Medicaid oo loogu talagalay Qoysaska leh Carruurta Qabta Naafanimada Maskaxda iyo Korriinka (I/DD)**. Marka aad dejiso ONE, nidaamyada dib u cusbooneysiinta ee mustaqbalku waa in ay noqdaan kuwo sahlan.

Miyuu ilmahaygu u baahan doontaa dib u eegista u qalmida oo oo dheeraad ah, oo aan ka ahayn Medicaid?
Carruurta qaarkood ayaa u qalanta Medicaid taasi oo ku saleysan naafanimadooda iyo in ay mareen nidaamkooda Kooxda Go'aaminta Naafanimada La filayo ee Medicaid (PMDDT) si ay u go'aamiso u qalmida. Carruurtaasi, dib u eegista xaaladooda naafanimo, oo ay dheer tahay dib u cusbooneysiinta Medicaid, ayaa la iskaga baahan yahay marka waqti la joogaba. Wakhtiga loo qabtay yeelashada dib u eegista PMDDT wuxuu ku xiran tahay da'da ilmaha iyo naafanimo la ogaaday. Si kastaba ha ahaatee, wakhtiga loo qabtay dib u eegistani wuxuu badanaa la mid yahay taariikhda dib u eegista u qalmida Medicaid. Taasi awgeed, waa dhici karta in lagaa codsado in aad dib u cusbooneysiiso Medicaid iyo PMDDT isla waqtigaasi. Dib u eegista ay sameyso PMDDT waxaa loo yaqaanaa **Dib u eegista Sii wadashada Naafanimada (CDR).**

Dhammaan carruurta PMDDT oggolaatay waxaa loo qoondeyn doonaa taariikhda dib u eegista naafanimada. Taariikhaha la qoondeeyay waxay ku saleysan yihiin da'da ilmaha iyo naafanimo la ogaaday. Ujeedada laga leeyahay dib u eegistani waa in la go'aamiyo haddii ilmuhu weli u qalmo Medicaid taasi oo ku saleysan lahaanshaha naafanimada. Tusaale, marka carruurta qaarkood da'doodu weynaato, waxay bilaabaan in ay gaaraan korriinka muhiimka ah oo la mid ah sida qayrkooda/facooda oo kale. Xaaladaha qaarkood, waxaa dhici karta in ilmuhu uusan buuxin

sharraxaada Xafiiska Social Security-ga (SSA) ee loogu talagalay qabida naafanimo. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan waxa laga filayo nidaamka CDR, *fiiri Talooyinka loogu talagalay Waalidiinta, Qaybta A2 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.*

Talooyinka loogu talagalay Waalidiinta marka Dib loo cusbooneysiinayo Medicaid aad leedahay ee la adeegsanayo Nidaamka Cusub ee OregONEligibility

A1. Dadka reer Oregon waxay Medicaid ku codsan karaan dhowr siyaabood:

- **Internet-ka**: Isticmaal Nidaamka Codsadaha ee ONE (ama mid ka sameyso https://one.oregon.gov/; caawimaada dhanka internet-ka ayaa laga helayaa internet-ka: Oregon Health Plan Quick Start Guide
- **Shakhsi ahaan**: Booqo xafiiska ODHS oo kasta; goobaha xafiiska ka hel internet-ka. La shaqee Hawl-wadaagaha Bulshada ee Maamulka Caafimaadka Oregon Caawiyaha Codsiga ee OHP; internet-ka hel Caawiye: https://healthcare.oregon.gov/Pages/find-help.aspx
- **Telefoon ahaan**: Xarunta Adeega Macmiilka ee ONE ka wac 1-800-699-9075 laga bilaabo 7 subaxnimo ilaa 6 galabnimo., Isniinta ilaa Jicmaha.

Ka hor inta aadan soo wicin:

Fadlan waxaad ogsoonaataa taasi iyada oo sababtu tahay barnaamijka ONE oo cusub, waqtiyada khadka lagu jiro waxaa dhici karta in ay dheeraadaan. Si taxaddar leh u raacista tilmaamaha dhanka afka ah waxay kaa caawin doonaan helida qofka saxda ah oo aad wakhti kooban ku helayso. Marka aad soo wacdo Xarunta Adeega Macmiilka ee ONE, waxaad heli doontaa farriin salaan ah oo kaa codsanaysa in aad doorato luqad. Marka xigta, waxaad dooran doontaa sababta aad u soo wacayso:

1. Beddelaada EBT
2. Caawimaada Dhanka Internet-ka ee Nidaamka Codsadaha (oo loogu talagalay iska caawinta dhibaatooyinka farsamo ee aad ku qabto koontadaada internet-ka, sida dib u dejinta password-ka ama nidaamka oo iska kaa xira)
3. Qorsheynta/Wareysiyada (si loo qorsheysto ama loo maro wareysiga ONE)
4. Su’aalaha iyo macluumaadka guud
5. Su’aalaha iyo macluumaadka guud ee u qalmida

Internet-ka:	**Shakhsi ahaan:**	**Telefoon ahaan:**
Isticmaal Nidaamka Codsadaha ee ONE: https://one.oregon.gov/; oo ah tilmaamaha caawimaada dhanka internet-ka: Oregon Health Plan Quick Start Guide	Booqo xafiiska ODHS oo kasta; goobaha xafiiska ka hel internet-ka. La shaqee Hawl-wadaagaha Bulshada ee OHA Caawiyaha Codsiga ee OHP; hel Caawiyayaal:	Xarunta Adeega Macmiilka ee ONE ka wac: **1-800-699-9075** laga bilaabo 7 subaxnimo ilaa 6 galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha.

A2. Tani waa waxa aad filayso marka la joogo waqtigii dib loo cusbooneysiin lahaa u qalmidaada PMDDT.

PMDDT ayaa kula soo xiriiri doonta waqtiga dib u eegista kaasi oo loogu talagalay macluumaadka cusub ee ka socda daryeel caafimaad bixiyayaasha ilmaha iyo dugsiga uu dhigto ilmuhu. PMDDT ayaa tixgelin doonta haddii ay jireen ka soo rayn dhanka caafimaadka tan iyo go'aankii rasmiga ahaa, iyo haddii ilmahaagu weli buuxinayo shuruudaha naafanimada sida ku cad sharciyadeeda.

PMDDT ayaa eegi doonta aqoonsiga dhibaatada jirta iyo ilaa xadka uu ilmuhu buuxinayo korriinka muhiimka ah. PMDDT waxay u baahan tahay **labo** sanadood oo ah diiwaannada caafimaadka, caafimaadka dhimirka, iyo waxbarashada si loo sameeyo go'aaminta caafimaad sida haddii ilmuhu buuxinayo shuruudaha naafanimada ee Xafiiska Social Security-ga (SSA) ee loogu talagalay u qalmida.

Wakhtiyo badan, isku duwaha adeegyada ee ilmahaaga ayaa kaa caawin kara isku soo ururinta dokumentiyadaasi:

- ✓ Liiska aqoonsiga dhibaatada jirta ee loo qalmo
- ✓ Dhammaan diiwaannada ka socda diiwaanka DD ee loo isticmaalay go'aaminta u qalmida DD.
- ✓ IEP u dambeeyay iyo wixii tijaabo/imtixaano ah ee uu sameeyay dugsigu ama ESD.

- ✓ Waa muhiim in la isticmaalo Bixinta Macluumaadka ee ODHS ee (ROI) ee foomka DHS ee MSC 3010 ee saxda ah si loola wadaago daryeel bixiye kasta oo ilmahaagu arkay **2 sano ee u dambeysay** (marka laga reebo dhanka ilkaha). Waxaad u baahan doontaa mid loogu talalagalay Xafiiska Social Security-ga (SSA), iyo mid loogu talagalay dugsiga hadda ama dugsigii u dambeeyay. ROI loogu talagalay SSA ayaa la iskaga baahan yahay xataa haddii ilmuhu uusan helayn faa'iidooyinka Sugidda Dakhliga ee Kabista ah (SSI).

Wixii dokumenti ah ee waalidiintu bixin karaan waa mid waxtar leh, oo ay ku jiraan wixii qiimeyn ah ee dhawaan la sameeyay iyo Qorshaha Waxbarasho ee Shakhsi (IEP) ee hadda jira. PMDDT waxay u baahnaan doontaa saxiixyada waalidka ee ku saabsan bixinta macluumaadka dugsiga hadda, mid loogu talalagalay SSA iyo mid loogu talagalay adeeg bixiye kasta oo ilmuhu arkay 2 sano ee u dambeysay. Haddii ilmahaaga da'diisu tahay 14 ama ka weyn tahay, waxay sidoo kale u baahnaan doonaan in ay saxiixaan bixinta macluumaadka (Foomka DHS ee 3010).

Haddii ilmaha la ogaado in uu caafimaad ahaan u qalmo Sugidda Dakhliga ee Kabista ah (SSI), waxaa dhici karta in aan loo baahan dib u eegis. Fadlan la socodsii shaqaalaha PMDDT haddii uu jiray go'aan uu lahaa Xafiiska Social Security-ga (SSA).

Kiisaska oo dhan waxaa dib loo eegi doonaa marka uu ilmuhu noqdo 18 jir si loo ogaado in uu buuxinayo shuruudaha qofka weyn ee loogu talagalay naafanimada. PMDDT waxay guud ahaan u baahan doontaa saxiixa qofka dhallinyarada ah ee weyn ee ku saabsan bixinta macluumaadka si loo helo diiwaannada.

Haddii uusan jirin dokumenti ku filan si loo gaaro go'aan caafimaad, waxaa dhici karta in PMDDT ay qabato jadwal qiimeyn oo loogu talagalay ilmahaaga.

A3. Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo (FAQ) iyo Macluumaadka ku saabsan Markii U horreysay ee La codsanayo Medicaid:

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) ayaa dejiyay Tilmaamaha Dib u cusbooneysiinta Medicaid oo loogu talagalay Qoysaska leh Carruurta Qabta Naafanimada Maskaxda iyo Korriinka (I/DD). Isku duwahaaga adeegyada ayaa ku siin kara nuqul, ama waxaad ka heli kartaa internet-ka:

https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/PROVIDERS-PARTNERS/WorkerGuides/ODDS-Medicaid-Guide-Families.pdf

- Af Ruushka: https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/PROVIDERS-PARTNERS/WorkerGuides/ODDS-Medicaid-Guide-Families-Russian.pdf
- Simplified Chinese: https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/PROVIDERS-PARTNERS/WorkerGuides/ODDS-Medicaid-Guide-Families-SimplifiedChinese.pdf
- Soomaali: https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/PROVIDERS-PARTNERS/WorkerGuides/ODDS-Medicaid-Guide-Families-Somali.pdf
- Isbaanish: https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/PROVIDERS-PARTNERS/WorkerGuides/ODDS-Medicaid-Guide-Families-Spanish.pdf
- Vietnamese: https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/PROVIDERS-PARTNERS/WorkerGuides/ODDS-Medicaid-Guide-Families-Vietnamese.pdf